

## IMPORTANT INFORMATION TO THE RENTER

Mudane renter

### **Bixinta guryaha cusub waxay bilaaban doonaan dhowaan**

Homes Victoria waxa ay howlgab ka dhigi doonaan 44 dabaq oo ah sarihii hore ee dhaadheeraa si dadka reer Victoria loogu dhiso guryo casri ah, raaxo ah oo ku ag yaala meelaha gaadiidka, waxbarashada, shaqooyinka iyo adeegyada.

Guryo cusub ayaa la dhisi doonaa marka qoysasku ka guuraan 12 Holland Court iyo 120 Racecourse Road, Flemington iyo 33 Alfred Street, North Melbourne.

Labadii bilood ee la soo dhaafay kooxdayada raritaanku waxay xiriir la sameeyeen si ay markaas isu bartaan, u sharaxaan nidaamka, uguna jawaabaan su'aalahaaga. Waxaan in ka badan 90% qoysaska taageero ka siinay sidii ay ku dhameystiri lahaayeen codsiyadooda raritaannada annagoo fahamnay baahiyahaaga, waxaad doorbidayso, iyo meelahaad ku xiran tahay. Toddobaadyada soo socda waxaan bilaabi doonaa inaan siino qoysaska guryo cusub.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah marka lagu soo bandhigo guri, oo ay ku jiraan wixii ku saabsan codsigaaga, fadlan la xidhiidh kooxdayada raritaannada. Waxaan halkaan u joognaa sidii aan kuu caawin lahayn ilaa gebagebada nidaamkan.

### **Buuxinta codsigaaga wareejinta si aad guri ugu guurto**

Qoysaska aan buuxin codsiga guurista, oo ay ku jiraan saxiixa foomka, ayaan weli u qalmin in la siiyo guri cusub. Toddobaadyadii la soo dhaafay kooxdayada raritaannadu waxay isku dayeen inay kugala soo xiriiraan telefoon iyo shaqsi ahaan.

Waxaan fahamsanahay in guuritaanku uu yahay wax adag waxaanan jeclaan lahayn inaan hubinno inaad dareemayso in taageero lagu siiyay si aad ugu guurtid guriga cusub, oo ay ku jirto in lagu tixgeliyo guryo cusub oo agagaarka xaafada ah oo la heli karo toddobaadyada iyo bilaha soo socda.



Need a translated  
version?

[Scan QR Code](#)

or visit:  
[homes.vic.gov.au/  
high-rise-victoria-renter-updates](https://homes.vic.gov.au/high-rise-victoria-renter-updates)

## Fadlan nala soo xidhiidh si aan kuu caawino.

Haddii aadan wali la kulmin kooxdayada raritaanada, ama aadan buuxin codsigaaga dib u-dejinta, fadlan la xidhiidh kooxdayada raritaanada si aan u sharaxno nidaamka, u fahanno baahiyahaaga oo aan u raadino guri kugu haboon adiga. Muhiimadayadu waa in aan kuu raadino oo aan ku siino guri sida ugu fiican u buuxinaya baahiyahaaga.

Waxaan kaa codsaneynaa inaad la xiriirto kooxda raritaanada ee waaxda ugu dambeyn **Jimcaha 2-da Febraayo 2024** si aad u buuxiso codsiga raritaan.

- Waxaad la xidhiidhi kartaa sarkaalkaaga guurista Isniinta ilaa Jimcaha 9-ka subaxnimo ilaa 5-ta galabnimo,
- Dadka degan 120 Racecourse Road, Flemington waxay sidoo kale la xiriiri karaan hogaamiyaha kooxda raritaanada, Hannah Kebede 0447 717 935,
- Dadka degan 12 Holland Court, Flemington waxay la xidhiidhi karaan hogaamiyaha kooxda raritaanada, Lauren Doogood 0447 866 403, ama
- Dadka degan 33 Alfred Street, North Melbourne waxay la xiriiri karaan hogaamiyaha kooxda raritaanka, Jackie Monaghan 0447 842 369, ama
- Iimayl noogu soo dir [relocationsteam@homes.vic.gov.au](mailto:relocationsteam@homes.vic.gov.au)

Waxaan rabnaa inaan kuu xaqiijino in waaxdu ay daboosho kharashaadka dib u dejinta sida kharashyada raritaanka, soo xirashada korontada, gaaska, interneedka iyo khidmadaha wareejinta taleefanka iyo boostada. Kooxdayadu si joogto ah ayay kuula soo xiriiri doontaa si aan u hubinno inaad la qabsatay gurigaaga cusub aana u maqalno horumarka dib u dhiska Flemington iyo North Melbourne.

Kiraystayaasha waxaa lagu dhiirigelinayaa inay hore usoo kaxeystaan qof taageera, sida saaxiib ama xubin qoys, ballan kasta oo ay la leeyihiin kooxda raritaanada. Waxa kale oo aad taageero ka raadsan kartaa wakiilka Ururka Kiraystayaasha Dadweynaha Victoria (Victorian Public Tenants Association - VPTA), Kiraystayaasha Victoria (Tenants Victoria) ama wakiil sharci yaqaan ah. Waxaan kuu diyaarin doonaa turjubaan ku taageera haddii aad u baahan tahay.

Had iyo jeer waxaanu kuula dhaqmi doonaa si ixtiraam, taageero, iyo daryeel leh. Waxaan rajeyneynaa inaan kaa taageerno inaad u gurto guri cusub.

Mahadsanid

**Peter Beaumont**



Agaasime

Ka-qaybgalka Raritaanka iyo Maaraynta Kiraynta  
Homes Victoria

08 / 01 / 2024

50 Lonsdale Street, Melbourne Victoria 3000  
GPO Box 4057, Melbourne Victoria 3001  
Telephone: 1300 650 172  
[www.homes.vic.gov.au](http://www.homes.vic.gov.au)

